HWDSB

# Warbixinta lagu kala Aragti duwan yahay

We all count.
HWDSB Student Census 2021

## Ku saabsan Warbixinta lagu kala Aragti duwan yahay ee HWDSB

Inta udhaxeysa Gu 'ga 2021-kii iyo Xilliga Qaboobaha ee 2022-kii, waxaan *ka shaqeynay "Dhammaanteen Waan xisaabsannahay : Tirakoobka Ardayga ee* HWDSB "ee dhammaan ardayda HWDSB. *Dhammaanteen Waan* Xisaabsannahay waxay uruurisay xogta tirakoobka ardayda sida midabka, diinta, aqoonsiga jinsiga, luqadda iyo naafanimada. Xog ururintan waxaa looga baahan yahay guddiyadda dugsiyada maadaama ay siiso guddiyadda xog muhiim ah oo ay u baahan yihiin si ay iuu ogaadan waxna uga qabtan caqabadaha nidaamsan ee ardayda ay wajahan iyada oo diiradda la saarayo barnaamijyada iyo kheyraadka. Dhammaan dugsiyada hoose iyo sare ee HWDSB, heerkayaga ka qeybgalka wuxuu ahaa boqolkiiba 48.

Tani waa hordhac ku saabsan xogta aan soo uruurinay oo aan u isticmaalnay soo saarista Warbixinta lagu kala Aragti duwan yahay. Hoos waxaa ku qoran sharaxaad kooban oo ku saabsan waxa aan sameynay, sababta aan u sameynay, waxa aan ka baranay iyo waxa xiga ee dhici doona. Bogga labaad waxaad ka heli doontaa tilmaamo ku saabsan sida loo isticmaalo aaladda turjumaadda ee mareegta guddiga si loo turjumo Warbixinta lagu kala Aragti duwan yahay iyo warbixinnada kale ee luqadaada aad doorbideyso.

Markaan uruurinay xogta Tirakoobka ardayda ee *Dhammaanteen Waan Xisaabsannahay*, waxaan isticmaalnay lambarka gaarka ah ee ku lifaaqan xogta arday kasta si aan ugu xirno waxa ay gaareen, imaanshaha, fayo-qabka iyo (halkaay khuseyso) xogta eryidooda. Marka xogta lagu xiray, waxaan ka saarnay lambarka gaarka ah ee aan u isticmaalnay inaan isku aadinno xogta si aan marnaba ardayda loo aqoonsan, ka dibna waxaan xisaabinay kala aragti duwanaanta.

## Waa maxay kala aragti duwanaanshuhu?

Marka aan aragno matalaadda koox aqoonsi ee natiijo gaar ah oo ka badan/ka yar inta ay tahay inay noqoto ama ka badan/ka yar inta aan fileyno, waxaan ugu yeernaa tani kala aragti duwanaansho. Tusaale ahaan, marka ardayda Madowga ama Asaliga ah la eryo in ka badan celceliska Guddiga, waxaan dhahnaa waxay si aan iswaafaqsanayn ayaa loogu matalaa xogtayada. Xogtayada, waxaan ku aragnay kala duwanaansho dhanka waxa ay gaareen, imaanshiyaha, fayo-qabka iyo eryida.

## Maxaa xiga ee dhici doona?

Iyada oo la dahfuraayo Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee Sannadaha-Badan, waxaan diiradda saareynaa istiraatiijiyado kala duwan si aan wax uga qabanno kala duwanaanshaha iyadoo la oganaayo lana baabi' inayo sinnaan la 'aanta nidaamsan ee aan uu wanaagsaneyn kooxo arday ah uuna horseedaya inay keenaan buundooyin hoose, maqnaanshiyaha badan, fayo-qabka hooseeya iyo eryida badan.


Waxaan ka shaqeyneynaa sidii aan u kobcin lahayn xogteena si joogto ah, sanadle ah ee *Dhammaanteen Waan* Xisaabsannahay xog uruurinta fasallada 7-aad iyo 10-aad iyo sidoo kale waalidiinta iyo mas 'uuliyiinta diiwaangelinta iyo fasalka 4-aad. Marka aan xogteenna kobcino, waxaan bilaabi karnaa inaan si qoto dheer u eegno kala duwanaanshaha si aan u fahanno waxa dhacaya. Tusaale ahaan, waxaan ognahay in ardayda Madowga ah la eryo in ka badan celceliska Guddiga laakiin ma garanayno tirada

ardayda Madowga ah ee la eryo ee sidoo kale  Muslim ah, jinsiyo kala duwan ah, naafo, ama lab/dheddig. Xog dheeraad ah oo dhammaystiran, waxey na siineysaa fursad aan ku eegi karno isgoysyadan jinsiyadaha waxeyna na siin kartaa warbixinada kala duwanaanshaha ee aadka uu faahfaahsan ee horseeda faragelinta iyo istaraatiijiyadaha ballaaran.


Waxaan ku xisaabtameynaa qoysaska si aan u taageerno *Dhammaanteen* Waan Xisaabsannahay si aan, si wada jir ah, uga wada shaqeyno natiijooyinka wanaagsan ee dhammaan ardayda. Fadlan eeg bogga 2-aad ee tilmaamaha turjumaadda oo fadlan booqo Warbixinta Xogta kala Duwanaanshahasi aad u hesho faahfaahin dheeraad ah.

## Sida loo Turjumo Bogagga Mareegta ee HWDSB

Markaad dhex qaado bog kasta oo HWSB ah, waxaad arki doontaa fallaarta liiska waxyaabaha ee qaybta sare ee bogga. Waxay u egtahay sidan:




Marka aad gujiso fallaarta hoose,
waxaad arki doontaa liiska waxyaabaha aad awoodo
ku soco si aad u doorato luqaddaada:




Markaad doorato luqaddaada, bogga oo dhan
d turjumaan:




Xaddidaadda: aaladda turjumaadda
kuma ma shaqeynayo faylasha la duubay
sida PDF-yada ama CSV-yada.